Maxkamadaha Shareecada Iyo Kufsiga: Denbiiluhu Waa Hilibka Aan Daboolnayn!

Saciid A. Ismaaciil
Sismail42@gmail.com
Feberwari 17, 2009

Sida Soomaalida badankoodu ay la socdaan, bishii Oktoobar ee sannadkii la soo dhaafay ee 2008, wadaaddada ka arrimiya magaalada Kismaayo waxay dhagax ku dileen gabar lagu eedeeyey in ay gogoldhaaf samaysay. Run ahaantiina, dadkii maqlay dhacdadaas badankoodu waxay u arkeen fal bahalnimo, wadaaddadii fuliyeyna waxay ku tuhmeen jahli iyo damiir la'aan isbiirsaday. Hase ahaatee, qoraaga maqaalkaani wuxuu isweydiiyey su'aasha ah: war abbooyow ammay wiilasha ka tahay dadaad iyo Alle ka cabsi ee aysan ka ahayn aqoon yari iyo damiir la'aan toona? Waxaa la wariyey in gabadha oo da'deeda lagu kala sheegay 13 sano iyo 23 sano ay wadaaddada u tagtay iyada oo damacsan inay dacwo ku oogto niman ay sheegtay in ay kufsadeen, haddaba su'aasha u baahan in la isweydiiyaa waxay tahay: **waa maxay sababta dacwadii kufsiga ee gabadhu wadatay u beddeshay gogoldhaaf gabadha qudheedii lagu soo eedeeyey? Xaajaduse ma ugubbaa mise waa soo jireen**?

Inta aynaan hoos ugu daadegin dulucda maqaalka, waxaan jeclahay inaan akhristaha horay ugu sii sheego in ujeeddada maqaalku aysan ahayn inuu dhaleeceeyo maxkamadaha shareecada, ama inuu ka faddilo xeerarka ciqaabta ee maxkamadaha madaniga ah, waayo qof ahaan waxaan rumaysnahay in xeerku si kasta oo uu u wanaagsanaado ama u xumaado uusan keligi bulshada wax ka beddeli karin. xeerkana samaan iyo xumaanba waxaa xukuma dhaqanka bulshada, oo bulshada ilbaxa ahi waxay ku khasban tahay inay yeelato xeerar ka tarjuma qiyamkeeda iyo hab-dhaqankeeda, si taa la mid ahna xeerarka bulshada dib-u-dhacu haystaa waxay ka tartumaan hab-dhaqankeeda. Waana tan la yiraahdo: " Faraska warta waad geyn kartaa laakiin kuma khasbi kartid inuu ka cabbo". Tusaale ahaanna, bulshada abawiga ah [= Patriarchy] ee wiilasha ka faddisha gabdhaha, ee hal-ku-dheggeedu yahay "Wixii xunba xaawaa leh", si kasta oo loogu dejiyo xeerar qurxoon oo dhigaya in ragga iyo dumarku siman yihiin, haddana, sina dumarka bulshadaas uguma suuroobayso inay helaan xuquuq la mid ah kuwa ragga. Soomaaliduna waa iyada tiraahda: "Boqol iyo afar iyo tobankaan aqaan waxaa isku fuuqsatay yaa kaa akhrisanaya!!!". Sidaa darteedna xeerka waxaa ka muhiimsan in marka hore la beddelo caqliga iyo hab-dhaqanka bulshada.

Si kastaba ha ahaatee, dhaqanka kufsiga dumarku waa mid soo jireen ah, oo tan iyo taariikh aad u durugsan dunida ka taagnaa, isla markaana ka dhaca meel kasta oo rag iyo dumar ay ku wada nool yihiin. Dhab ahaantiina, ummadaha dunidu kuma kala duwana jiritaanka iyo jiritaan la'aanta falka kufsiga, balse waxay ku kala geddisan yihiin sida loo wajahayo faldenbiyeedka. Haddaba, su'aasha u baahan in la isweydiiyaa waxay tahay: **Waa maxay xukunka shareecada islaamku ay siisay kufsiga dumarka?**

Islaamku sinada wuxuu u arkaa denbi weyn [= kabiira] iyo waddo sheydaan. Arrinkaasna islaamku wuxuu kala siman yahay diimaha kale ee samaawiga ama Ibraahiimiga ah. Sinada iyo kufsiguna waxay wadaagaan falka galmada, waxayse ku kala duwan yihiin xagga nuxurka, oo sinadu waxay dhexmartaa nin iyo haweenay

qaangaar ah, maskaxdooduna fiyowdahay, isla markaana falka raalli isaga ah. Laakiin si taa ka duwan kufsigu wuxuu ku dhisan yahay jajuub iyo dhagar, wuxuuna dhexmaraa nin iyo haweenay midkood la khasbay[1], ama aan qaangaar ahayn, ama maankiisu uusan dhammayn.

Quraanka kariimku kama hadlin kufsiga, laakiin wuxuu ka hadlay sinada ama galmada labada ruux ay raalliga isaga yihiin, sidaa darteedna fuqahada islaamku xukunka kufsiga waxay ka raadiyeen masaadirta kale ee loo adeegsado sharci dejinta. Xukunka kufsigana waxay sal uga dhigeen xaddiiska nebiga ee oranaya: " Alle ummadayda waa u cafiyey khaladkooda, illowgooda, iyo wixii lagu khasbo [= *Maa istukrihuu caleyhi*]". Xaddiiskaasna waxay kala soo baxeen in haddii haweenayda [iyo xataa ninka] sino lagu khasbo oo la kufsado, aysan wax denbi ah yeelanayn, mudnayna in la ciqaabo.

Khasbidda iyo jajuubkuna kuma koobna in muruq lagu muquuniyo oo keliya, balse waxay yeelan kartaa noocyo badan, oo waxaa soo hoos galaya arrimo badan oo qofka iraaddadiisa wax u dhimaya. Tusaale ahaan, sebenkii Cumar bin Khaddaab, haweenay uur leh baa waxay ku doodday in lagu khasbay galmo, kaddib markii ninku u diidey inuu biyo ka waraabiyo jeer ay isu dhiibto, iyaduna biyaha ay aad ugu oommanayd. Cumar iyo Cali bin Abii Daalib-na waxay isku raaceen in haweenaydaas faraha laga qaado, oo aan wax kale oo daliil ah la weydiin. Sidoo kalena, dhacdo taas la mid ahi waxay dhacday sebenkii Cumar bin Cabdul-Casiis.

Laakiin su'aasha jawaabta u baahni waxay tahay**: muxuu noqonayaa xukunka qofka isagu iskii ula yimaada falka kufsigu?**. Fuqahada islaamku waxay qabaan in ciqaabta uu mutaysanayo ninka haween kufsadaa ay tahay in lagu fuliyo xadka[2] sinada, oo ah in dhagax lagu dilo haddii uu yahay nin guursaday[3], haddii uusan weli guursanna in kun jeedal lagu dhufto, hal sanana laga musaafuriyo deegaanka uu ku nool yahay. Fuqahada qaarkoodna waxay intaas ku dareen in loo baahan yahay inuu bixiyo meherka[4] haweenayda uu kufsaday, oo haddii haweenayda la kufsaday ay xor tahay wuxuu bixinayaa meher u dhigma kan laga bixiyo dumarka la midka ah, haddii ay addoon tahayna wuxuu bixinayaa wax u dhigma inta uu le'eg yahay qiimo dhaca ku yimaada.

Qaar kale oo fuqahada ka mid ahi waxay qabaan in ruuxa kufsiga geysta lagu xukumo xadka xiraabada ee ay sheegayso Aayadda 33aad ee Suuradda al-Maa'idah, waayo kufsigu waa fal denbiyeed dhaawacaya nabadda iyo xasilloonida bulshada. Tusaale ahaanna, Faqiihii Ibnu Carabi wuxuu rumaysnaa in kufsigu yahay nooca ugu xun ee xiraabada. Aayadda xiraabaduna waxay leedahay sidatan: "Abaalka kuwa la dagaallama Eebbe iyo Rasuulkiisa oo dhulka la socda fasaad waa in la dilo ama la deldelo ama gacmaha iyo lugaha isdhaaf loo gooyo, ama dhulka laga musaafuriyo, taasina waa inay mudanyihiin dulli adduunka ah iyo cadaab weyn oo Aakhiro ah".

Waxaa intaa dheer, in Abuu Xaniifa oo daliishanaya dhacdo uu xukumay khaliifkii 2-aad ee Cumar Bin Khaddaab, uu fatwooday in haddii ninku guursado haweenaydii uu kufsaday ay tahay in laga khafiifiyo ku oogidda xadka. Madaahibta fiqiga islaamka ee kale iyagu asal ahaan ma qabaan fikraddaas, haddana ku dhaqanka xukunkaasi waa mid si weyn ugu baahsan dunida islaamka oo dhan, waayo dhaqamada shucuubta islaamka badankoodu waxay xiriir toos ah dhexdhigaan sharafta qoyska iyo qabiilka iyo xubinta taranka ee gabadhooda[5] Si loo badbaadiyo sharafta qoyska iyo qabiilkana

waxaa xal la mooday in denbiilaha lagu baryo inuu israacsado dhibbanaha uu dhaawacay. Falkaas oo dhab ahaantii ka dhigan in waraabaha lagu baryo inuu feento sabeenta uu dhaawaco. Maxaa yeelay waxaa si weyn loo rumaysan yahay in guurka noocaas ahi uusan caadi ahaan mirodhal noqon.

Dhanka kale, fuqahada islaamka badankoodu waxay qabaan in marka la fulinayo xadka ay ragga iyo dumarku ku kala duwan yihiin in ragga xadka lagu fuliyo iyaga oo jooga meel dadweynu ay ka arki karaan, laakiin dumarka waxaa xadka lagu fuliyaa iyaga oo jooga meel ka asturan indhaha dadweynaha. Sidoo kale, fuqahada qaarkood waxay qabaan in aan loo baahnayn in dumarka lagu fuliya ciqaabta musaafurinta, oo waxay leeyihiin musaafurintu waxay ku gooni tahay ragga, sababta oo ah haweenayda la musaafurinayaa waxay u baahan tahay in ay hesho nin maxram ah oo weheliya.

Dhab ahaantiina, ciqaabta shareecadu kufsiga siisay waa mid qeexan oo si fudud loo fahmi karo, culumada islaamkuna iskuma qaban in kufsigu denbi yahay iyo in kale, sidoo kale iskuma qaban in haweenayda la kufsaday la ciqaabayo iyo in kale, laakiin halka khilaafku ka taagan yahay, oo sartu ka qurmaysaa waa: **sida lagu ogaanayo in haweenayda la kufsaday iyo in kale**? **Maxaa lagu caddaynayaa inay falka raalli ka ahayd iyo in aysan ka ahayn**?. Qofka dumarka ah ee ku dacwoonaysa in la kufsaday waxaa looga baahan yahay in ay qaalliga hor keento afar nin oo Alle kacabsi leh, oo ka markhaati kaca in ay arkeen iyada oo la kufsanayo[6]. Waa in ay noqdaan afar nin, oo maragga dumarku qiimo ma leh[7], waana in dhammaantood ahaadaan muslimiin sumcaddoodu wanaagsan tahay, waana in ay arkaan kasha iyo mooyaha oo isku jira oo laga yeeli maayo waxaan aragnay isaga oo guri kula jira, ama gogol kula jiifa, ama salaaxaya, …iwm[8]. Waana in afartuba isku raacaan in falku ka dhacay hal meel iyo hal waqti.

Tusaale ahaan, sharciyada xuduudda ee Bakistaan iyo Bangaladesh labaduba waxay oranayaan: " Sinada iyo kufsiga (= Al-Istikraah/Zina Bil-jabr) waajibin kara xadka waxaa lagu caddaynayaa mid ka mid ah labadaan arrimood ee soo socda:

A- In eedaysanuhu qirto denbiga, ama
B- In ugu yaraan ay arkaan afar nin".

Haddaba, su'aashu waxay tahay: sidee bay suurogal ku noqonaysaa in la helo afar nin oo ammaano leh oo ka marag-kaca in gabar la kufsaday? Ma jiraa nin wuxuun caqli ah leh oo haweenay ku kufsanaya afar nin hortood –[Xaaladaha yar ee la sawiran karo in arrinkaasi dhaco waxaa ka mid ah xilliga dagaalka lagu jiro iyo dabcan haddii la duubayo filin boonograafi ah]?. Xataa haddii ay dhacdo inuu afar nin hortood ku kufsado, nimankaasi ma ku dhiirran karaan inay qaalliga hortiisa marag ka furaan? Soo ma dhici karto in lagu eedeeyo inay denbiilaha denbiga la wadaagaan, iyada oo lagu eedaynayo inay ku fiirsadeen halkii ay ka ahayd inay ka celiyaan. Teeda kale, haddii afarta nin midkood si uun uga noqdo inuu ku marag furo denbiilaha, saddexda kale waxay khatar ugu jiraan in la ciqaabo iyadoo lagu eedaynayo inay qadaf iyo magac-dil geysteen.

Qoraalada taariikhda islaamkuna waxay wariyaan dhacdo caan ah oo arrinkaan loo daliishado. Muqiirah ibn Shucba oo sebenkii Cumar bin Khaddaab ahaa gubarnatoore magac-dheer ayaa waxaa lagu soo dacweeyey inuu saaxiib la yahay, oo uu ka sinaystey haweenay la oran jirey Ummu Jamiil. Saddex ka mid ah afartii nin ee

markhaatiga ahaana waxay si cad u sheegeen wixii ay arkeen, laakiin ninkii afraad daliil cad waa sheegi waayey, oo wuxuu yiri: " Waxaan arkay wax kor iyo hoos u kacaya, neeftuur, waxaana arkay iyada oo labadeed lugood ay garbihiisa saaran yihiin, lana moodo dhego dameer, mase ogi wax intaa dhaafsiisan." Cumarna wuxuu sheegay in markhaatigu kala dhimman yahay, wuxuuna amar ku bixiyey in saddexda nin lagu fuliyo xadka Qadafka.

Kolkii saxaabada qaarkood ay nebiga (SCW) uga ashtakoodeen dumarkooda oo ay rag kale uga shakiyeen, waxaa soo degtey Aayadda quraanka ah ee oranaysa: " Kuwa sino ku gana [= sheega] dumarka dhawrsan, dabadeedna aan keenin afar marag ah ku dhufta siddeetan karbaash, abidkoodna marag ha ka aqbalina, kuwaasina waa uun faasiqiin" [Suurat An-Nuur,4]. Saxaabadu waa yaabeen, nebigana waxay weydiiyeen sida ay suurogal ku tahay in ay helaan afar nin oo falkaas marag uga noqdo. Ugaaskii beesha al-Aws oo la oran jirey Sacad bin Cubaadana wuxuu yiri: "Rasuulkii Allow haddii aan afadayda nin ugu imaado ma u sugayaa jeer aan afar markhaati ka helo! ", nebiguna wuxuu ugu jawaabay "Haa", Sacadna wuxuu yiri: "Allaan ku dhaartaye waxaan la dhacayaa seef gal la'. Markaasaa Rasuulku (SCW) wuxuu yiri: ma la yaabaysaan masayrka Sacad, Anaa ka masayr badan, anigana Allaa iga masayr badan". Dabadeedna waxaa soo degay aayadaha loo yaqaan "Aayaat al-Mulaacana", oo ragga dumarkooda rag kale ku arka xaq u siinaya inay qaalliga u dacwoodaan xataa haddii aysan heli karin afar nin oo markhaati ah. qaalliguna afada iyo saygeeda mid walba wuxuu ku dhaarinayaa inuu run sheegayo, haddii ay dhaartaanna waa kala furayaa.

Hayeeshee, dumarka la kufsadaa ma heli karaan fursaddaas oo kale. Sidaa darteedna, haweenayda la kufsado ee u dacwoota booliska waddamada fuliya ciqaabta xudduudka waa ku adag tahay in ay caddayso in la kufsaday, kiiska dacwadeeduna caadi ahaan wuxuu ku danbeeyaa in la yiraahdo waxay qiratay in ay dhilaysatay, oo markaas iyadii dhibbanaha ahayd xad lagu oogo[9]. Dhibaatadaasina waa mid si joogto ah u qabsata dumarka ku nool waddama sheegta in ay shareecada islaamka ku dhaqmaan sida Sacuudiga, Iiraan, Pakistaan, Suudaan iyo Nayjeeriya [=gobolada shareecada lagu dhaqo]. Tusaale ahaan, warbixinaha qaarkood waxay tilmaamayaan in dadka ku jira xabsiyada dalka Bakistaan ee ku eedaysan sinada ay 80% dumar yihiin, dumarkaasna afartii kasta saddex ka mid ahi ay yihiin dumar la kufsaday. Sidaa awgeedna, dumarka waddamadaasi waa ka maagaan in ay dacweeyaan ragga kufsada, sababta oo ah kolka ay dacwoodaan waxa qura ee ay hubaan inay helayaani waa in la ogaado in la kufsaday, oo waxaa isugu darsamaya xaqooda oo la duudsiyo iyo in lagu shaabbadeeyo in la kufsaday, arrinkaas oo caadi ahaan u horseeda guur la'aan iyo mustaqbal madow. Gaar ahaanna, khatarta haweenayda la kufsaday ay la kulmi karto waxay sii siyaadaysaa haddii ay uur yeelato. Maxaa yeelay uurka waxaa loo adeegsadaa sidii inuu yahay daliil cad oo muujinaya in ay sinaysatey[10]. Sida la og yahayna wadaaddada badankoodu waa xarrimaan in dumarku iska soo ridaan ilmaha, xataa haddii ilmuhu ka abuurmeen kufsi. Tusaale ahaan dalka Pakistaan soo rididda ilmuhu gebi ahaanba waa mamnuuc[11], haweenayda iyo dhakhtarka ku kacaan waxay mutaysan karaan toban sano oo xarig ah. Sidoo kale, qaalliyaasha maxkamadaha shareecadu caadi ahaan ma oggola in la adeegsado baaritaannada DNA-da.

Dhanka kale, ninka kufsiga lagu eedeeyey haddii lagu waayo denbiga lagu eedeeyey wuxuu xaq u yeelanayaa inuu maxkamad la tiigsado ciiddii eedaynta u soo jeedisey, isaga oo ku dacwoonaya in sharaftiisa iyo sumcaddiisa meel looga dhacay. Waxayna

u badan tahay in qaalligu haweenayda la kufsaday uu ku xukumo inay gashay xadka loo yaqaan Qadafka. Marka lagu xukumo qadafkana waxay mutaysan kartaa ciqaab isugu jirta karbaash, xarig iyo ganaax maaliyadeed[12].

Dhanka kale, qaalliyadda maxkamadaha shareecadu kolka ay qaadayaan dacwooyinka ku saabsan sinada iyo kufsiga waxay xoogga saaraan in falalkaasi yihiin anshax-xumo iyo xaq Alle oo lagu xad gudbey, waxayna iska indho tiraan in kufsigu yahay xaq banii'aadan oo lagu tuntay[13], isla markaana uu leeyahay xanuun isugu jira jir, naf iyo bulsho. Waxay kaloo iska indho-tiraan in Eebbe yahay naxariis badne awooda inuu addoonkiisa u denbi dhaafo maalinta qiyaame, laakiin aadanuhu uusan lahayn dulqaad iyo naxariis uu ku caffiyo dhibka ifka loogu geysto. Qaalliyadu waxay illoobaan in caddaaladda, sinnaanta iyo naxariistu ay yihiin ruuxa diinta. Waxay kaloo illoobaan in loo baahan yahay in sharcigu ilaaliyo anshaxa iyo mabaadida bulshada, laakiin isla markaas uusan ku xadgudbin xaqa qofku u leeyahay inuu sharaf iyo xorriyad ku noolaado. Xikmadda xadka loo fulinayaana ma aha in la ciqaabo eedaysanaha, balse waa in la helo bulsho caafimaad qabta, oo is-haysata. Waxgaradka dunida oo dhammina waxay isku waafaqsan yihiin in denbiilaha oo ciqaabta ka baxsadaa ay ka wanaagsan tahay in la ciqaabo qof aan denbi lahayn.

Intaa waxaa dheer in wadaaddada islaamka – iyo xataa qaar ka mid ah kuwo diimaha kaleba- ay rumaysan yihiin in dumarku ay kufsiga masuul ka yihiin, waayo dumarku waa aalad sheydaanku u adeegsado baadiyaynta wiilasha Aadan. Haweenayda waddada marta, ama xeebta tagta iyada oo catar iyo cusbur marsatayna waa shabaag sheydhaanku ku ugaarsanayo ragga.

Tusaale ahaan khudbo dood badan dhalisay oo masjid ku yaal magaalada Sydney ee dalka Australia uu ka jeediyey wadaad la yiraahdo Shiikh Taaju-Diin al-Hilaali wuxuu ku andacooday in falka sinada ay dumarku 90% masuul ka yihiin. Khudbada oo ku caanbaxday magaca "Hilibka Aan daboolnayn" wuxuu Shiikhu ku yiri: " Alle ragguu ka hormariyey dumarka oo wuxuu yiri: "tuugga iyo tuugadda gacmaha ka gooya …" laakiin haddii aan eegno ciqaabta quraanku siiyey denbiga sinada waxaan arkaynaa isaga oo leh: " Saaniyadda iyo saaniga mid kasta ku dhufta 100 jeedal", haddaba maxaa quraanku tuugga uga hormariyey tuugadda oo u dhihi waayey tuugadda iyo tuugga? Ragga ayaa laga hormariyey dumarka, waayo waaqica ayaa sidaas ah, oo ragga ayaa la saaray inay maciishadda kasbaan… laakiin marka sinada la joogo mas'uuliyadda 90% waxaa leh dumarka ee raggu ma leh. Sababta oo ah iyada ayaa haysata hubka damac gelinta. Waa iyada midda dharka dhigatay, oo gaabisay, oo isruxday, oo mikyaajka iyo boolbaraha marsatay, oo waddada u baxday Allaan ka magan galnaye iyada oo dheelinaysa … daymo, muusood, salaan, hadal, ballan, kulan, denbi iyo Long Bay jail. Dabadeedna waxaa kuu imanaya qaalli aan naxariis lagu ogayn oo ku siinaya 65 sano [Shiikhu wuxuu tilmaamayey dacwo ku socotay wiilal Lubnaani ah oo dumar Australian ah ku kufsaday xeebta magaalada Sydney], … laakiin musiibada oo dhan yaa bilaabay?
Al-Hilaali oo khudbaddiisii sii watayna wuxuu yiri: " Suugaan-yahankii al-Raafici wuxuu suugaantiisa ku yiri: haddii la ii keeno kufsi iyo sharaf [= Cirdi] lagu xad-gudbey, ninka waa edbin lahaa, haweenaydana waxaan ku xukumi lahaa xabsi daa'im.

Oo Raaficiyow maxaad sidaa u yeelaysaa? Maxaa yeelay haddii aysan ka tegi lahayn hilibka oo feydan mukulaashu ma dafteen. Haddii aad qaadato kiilo hilib ah oo aadan gelin furunjeerka iyo xataa jikada, laakiin aad uga tagto saxanka oo yaal xooshka

guriga ka horreeya, dabadeedna aad deriskaaga kula ilaaqtanto in bisadihiisu hilibkii cuneen, waxaad noqonaysaa nin waalan! Eedda ma waxaa leh bisadda mise hilibka aan la asturin. Haddii aad daboosho hilibka bisaduhu kuma gaaf wareegayaan. Haddii hilibku ku jiro furunjeerka, si kasta oo ay isugu daydo ma heli karto, mukulaashu waa urinaysaa intay doontana madaxay derbiga la dhacaysaa , laakiin heli mayso. Haddii ay ku jirto qolqolkeeda, iyo gurigeeda iyo xijaabkeeda, iyo dhawrsanaanteeda dhibaato ma dhacdeen !!!".

Sidaa darteedna, la yaab ma leh in qaalliyaasha maxkamadaha islaamku marka ay qaadayaan dacwada kufsiga, ay si joogto ah ugu doodaan in haweenayda la kufsaday ay iyadu masuul ka ahayd in la kufsado, iyaga oo xukunkooda ku salaynaya in haweenayda la kufsaday ay xirnayd dhar aan asturnayn[14], ama in keligeed ay habeen socotay,…iwm Tusaale ahaan, magaalo la yiraahdo al-Qatiif oo ku taal Bariga dalka Sacuudiga, waxaa ka dhacay kufsi muddo dheer saxaafadda gudaha iyo tan dibedduba ay hadal hayeen, ururrada adduunka ee xuquuqu insaankuna ay warbixinahooda ku xuseen, keenayna in si weyn looga faalloodo garsoorka Sacuudiga. Dhacdadaan oo ku caanbaxday magaca "Gabadhii Qatiif", qaalligii xukumay wuxuu go'aamiyey in gabadhaan oo ay toddobo nin kufsadeen lagu dhufto 200 oo karbaash iyo in lix bilood la xiro. Sababta ay ciqaabta ku mutaysatayna qaalligu wuxuu ku macneeyey in iyada iyo nin kale oo aan maxramkeeda ahayni ay keligood wada joogeen [= khalwo].

Wadaaddada islaamka oo badankoodu ay la dhacsan yihiin sheeko xariirtii shucuubtii Bariga Dhexe waxay rumaysan yihiin in dumarku leeyihiin shahwo xad-dhaaf ah oo aan la hor istaagi karin, oo bilmatal Carabtu waxay tiraahdaa: "Shahwadu waa boqol, sagaashan iyo sagaal waxaa la siiyey dumarka, halka soo harayna waxaa wadaagey ragga". Tusaale ahaanna, Maxkamadda Shareecada Ee Federaalka ee dalka Pakistaan oo ka hadlaysa kufsigu, waxay tiri sidatan: "Inkasta oo gabadhu ay qayb ahaan jeceshahay in falku dhaco [=faraxumaynta], haddana waa adagtahay in ay qirato … Run ahaantii ma yara in haweenay qayb ahaan rabtey, ay u dhaqanto sidii in la xoogay, haddii nin uga yaabiyo caashaq iyo shukaansi, jacayl samayn iyo habsiinna jac iskama tiraahdo". Ragga Soomaaliyeedna waa kuwa tebiya in Boqoraddii Araweelo ahayd ay bilis-xaawo kula dardaarantay: Maandhooyin "Diida waxaad doonaysaan!!!".

Dhab ahaantii, waxaad mooddaa in qaalliyaasha maxkamadaha shareecadu ay rumaysan yihiin qaacido oranaysa: ninka kufsiga lagu eedeeyey waa beri jeer denbigu ku caddaado, laakiin si taa ka duwan haweenayda la kufsaday waa eedaysane jeer ay caddayso berinimadeeda. Qaacidada sheegaysa in shubhadu joojiso xadkana (= dar al-xuduud bi al-shubuhaat) badanaa waxaa loogu daneeyaa ragga oo qura. Waxaana naxdin iyo murugo leh in meelo badan oo dunida islaamka ka mid ah ciqaabta uu mutaysto ninka faraxumeeya haweenay dhimatay uu ka culus yahay kan kufsada haweenay nool.

Ugu dambayntii, waxaa xusid mudan in waddamada islaamka badankoodu ay ka fogaadaan fulinta ciqaabaha shareecada islaamka ee loo yaqaan "Xuduudda", taasina kuma iman jahli looga sugan yahay islaamka iyo diin la'aanta madaxda dowladaha islaamka toona, balse waa mid ka dhalatay culayska arrinku leeyahay. Waxaana xusid mudan in dhammaan waddamada islaamka ee xuduudda fuliyaa ay maanta jecel yihiin in la casriyeeyo ciqaabaha xuduudda. Tusaale ahaan, Wasaaradda Caddaaladda

ee Sacuudigu intii muddo ah waxay ku celcelisaa inay wadaan hawl ay dib-u-habayn ugu samaynayaa nimaadkooda garsoorka, waxaana la qiyaasayaa in waxa ugu horreeya ee dib-u-habaynta lagu samaynayaa ay yihiin xuduudda iyo habka loo fuliyo. Sidoo kale, dalka Pakistaan muddo dheer waxaa ka taagan dood iyo khilaaf culus oo ku saabsan fulinta xuduudka, siiba xadka sinada iyo kufsiga.

Isku soo duuboo, Soomaalidu haddii ay dhab ahaan doonayso in shareecada lagu xukumo waa in ay caleemo qoyan ku soo dhaweeyaan wadaaddada, isla markaana ay salaan sharaf u taagaan wiilashii gabadha dhagaxa ku diley, haddii aysan sidaa yeelinse waa in ay ogaadaan in ku dhaqanka shareecada ay far uga taagan tahay [oo malaha ay rabaan shareeco xeer-jajab ku dhisan]!!!

---

[1] In haweenay nin kufsato ma aha fal caadi ahaan dhaca, maxaa yeelay raggu marka ay falka galmada samaynayaan waa in ay doonid iyo damac yeeshaan, laakiin haweenayda la kufsanayo loogama baahna inay rabitaan yeelato. Taa awgeedna, fuqahada mad-habta xanafigu waxay yiraahdeen: haddii haweeni afar jeer qirato in ay nin kala sinaysteen, laakiin ninku diido inuu la sinaystey, dacwadaasi waa xirmaysaa. Waxayna ku doodeen in falka sinadu uusan dhici karin haddii la waayo iraadada ninka, sidaa darteedna maadaama ninkii diidey in falku ka dhacay, dacwada oo dhammi waxay noqonaysaa wax kama jiraan. Laakiin, dhanka kale, waxaa suurogal ah in ninka lagu khasbo inuu haweenay ka sinaysto isaga oo aan raalli ka ahayn, sida in boqor, shufto, …iwm ay ku khasbaan. Sidaa awgeedna, fuqahada islaamku waxay isweydiiyeen su'aasha ah: ninkaas xadka sinada ma lagu fulinaya mise maya? Fuqahada islaamkuna guud ahaan waxay qabaan in haddii ninka lagu handado in naftiisu khatar galayso muddada falka galmadu socdo, uusan wax eed ah lahayn, falcelinta jirkiisuna aysan daliil u noqonayn doonid iyo inuu raalli ka ahaa.

[2] Erayga xad oo wadartiisu tahay xuduud, marka toos loo macneeyo wuxuu noqonayaa xadk Alle, laakiin eraybixin ahaan waxaa loola jeedaa denbiyada Eebbe go'aamiyey ciqaabta uu mutaysanayo qofkii ku dhaca. Xuduudkaasina waa kuwo tiro yar.

[3] Waxaa jira dad qaba in rajmiga (= dhagax ku dilka) ruuxa guursaday haddii uu sinaysto uusan ahayn xukun quraanka ku soo arooray, waxa keliya ee quraanka ku soo aroorayna ay tahay karbaashka. Dadkaani waxay ku doodaan in dhacdooyinka dadka dhagaxa lagu diley waqtigii nebiga lagu saleeyey nusuusta Towreedkii nebi Muuse, ayna dhacday ka hor intaysan soo degin aayadaha quraanka ah ee dhagaxa karbaashka ku beddelay. Haddii si kale loo yiraahdo culumadaani waxay qabaan in xukunka rajmiga la nasakhay, islaamkuna uusan qabin in qof dhagax lagu dilo.

[4] Waxaa xusid mudan in Carabtu meherka u taqaan meherka iyo yaradka oo wada jira.

[5] Waxaa sheegid mudan in dhaqankaasi uusan ahayn mid muslimiinta oo qura ku kooban, balse ay la wadaaga ummado kale. Guud ahaanna, bulshooyinka sharafta qoyska iyo qabiilka ku xira xubinta taranka ee dumarka waxaa ku badan in kufsiga dumarka raggu ku kala aargutaan iyo weliba dilka loo yaqaan dil-sharafeedka [= honor killing].

[6] Maxkamadaha shareecadu caadi ahaan ma leh qareen denbiilaha muddaci ku ah (Prosecutor), oo baaritaan ku sameeya dacwadda, hawshaasna waxaa laga sugayaa in ay qabato haweenayda ku doodaysa in la kufsaday.

[7] Cilmi baarayaasha qaarkood waxay rumaysan yihiin in Aayadda Quraanka ah ee sheegaysa afarta nin ee markhaatiga ahi ay asal ahaan u soo degtey si dumarka looga difaaco qadafka iyo sumcad dilka, laakiin raggu ay goor dambe siiyeen tafsiir ka duwan kii ay markii hore lahayd. Aqoon-yahannadaani waxay qabaan in Aayadaha ka hadlaya afarta nin ee maragga ahi ay ku soo degeen dhacdadii qabsatay Caa'isha Bintu Abii Bakar oo ka mid ahayd dumarkii nebiga (SCW) u dhaxay. Waa dhacdada caanka ah ee loo yaqaan "Sheekadii Been-abuuradka/ Qisat Al-Ifki". Laakiin nasiib-darro afarta markhaati maanta waxaa loo adeegsadaa si dumarka loo dulmiyo.

[8] Qofka qiranaya sinada iyo kufsiga ama cid kale ku eedaynaya sino iyo kufsi waxaa laga doonayaa inuu adeegsado erayo qeexaan, loomana oggola inuu adeegsado sarbeeb iyo erayo maldahan. Waa inuu qirtaa inuu xubintiisa taranka ku muday xubinta taranka ee ruux kale, ama waa inuu ka marag kacaa inuu arkay labada xubnood ee taranka oo isku jira. Tusaale ahaanna, Nebigu (SCW) ka hor intii uusan saxaabigii Maacis uusan ku fulin xadka, wuxuu ku yiri: "Waxaa laga yaabaa inaad dhunkatay, waxaa laga yaabaa inaad taabatay, ama aad eegtay", Maacisna wuxuu ku lahaa "Maya", dabadeedna nebigu wuxuu weydiiyey: " Haddaba, xubintaada ma ku librisay xubinteeda?" isaguna wuxuu yiri: "Haa", nebiguna wuxuu yiri: " ma sida usha loogu mudo qasaca indhakuusha ama xarigga loogu rido ceelka?" isna wuxuu ku jawaabay: "Haa", ugu dambayntiina nebigu wuxuu weydiiyey Maacis: " Ma taqaan macnaha sinada?" wuxuu yiri: "Haa! Waxaan si xaaraan ah ugu sameeyey waxa ninku si xalaal ah ugu sameeyo afadiisa".

[9] Dalalka islaamka ah badankooda boolisku waa hey'ad ragga u gaar ah, oo tusaale ahaan dalka Sacuudiga gebi ahaanba kama jiraan dumar boolis ah, sidaa darteedna dumarka la kufsadaa ma heli karaan dumar boolis ah oo ay u dacwoodaan. Waxaa taa ka daran in waddamada qaarkood –sida Bakistaan- Booliska qudhoodu qayb lixaad leh ka qaataan kufsiga dumarka, siiba dumarka kufsiga uga soo dacwooda. Guud ahaan, ragga booliska ahi haweenayda ugu timaadda dacwo kufsi la xiriirta waxay u qaataan in ay tahay qof anshax xun oo ka cararaysa in xad lagu fuliyo.

[10] Culumo ay ka mid yihiin Imaam Maalik iyo Axmed Bin Xanbal ayaa iyaga oo daliishanaya dhacdooyin dhacay sebenkii khulufadii Cumar bin Khaddaab iyo Cali bin Abii Daalib, waxay qabaan in uurka haweenayda aan la qabin uu daliil u yahay in ay sinaysatay. Oo bilmatal Cali bin Abii Daalib waxaa laga wariyey inuu yiri: " War dadow sinadu waa labo nooc: sino qarsoon iyo sino muuqata, sinada sirta ahi waa midda markhaati ka marag-kacaan, taasna dadka markhaatiga fura ayaa marka hore tuuraya, dabadeedna Imaamka, dabadeedna dadweynaha. Sinada muuqataana waa in la arko uur ama la qirto, imaamka ayaana ugu horrayna cid tuurta." Taa awgeedna, qaalliyada maxkamadaha shareecadu uurka haweenayda aan la qabin isla markaan aan ku dacwoon in la kufsaday, waxay daliil uga dhigtaan inay dhilaysatay.

Laakiin si taa ka duwan Imaamyada Abuu Xaniifa, Shaafici, Ibnu Xasmi iyo weliba Axmed bin Xanbal oo iyaguna markooda daliishanaya dhacdooyin la wariyey inay dhaceen sebenkii khulafadii Cumar bin Khaddaab, Cusmaan bin Cafaan iyo Cali bin Abii Daalib, waxay qabaan in uurka haweenayda aan la qabin uusan daliil u ahayn in ay dhilaysatay. Tusaale ahaan, waxaa la wariyey in Cumar bin Khaddaab loo keenay haweenay uur leh oo lagu eedaynayo inay sinaysatey, qaraabadeeduna ay sheegayaan inay tahay qof anshax badan, Cumarna wuxuu haweenaydii waydiiyey inay u sheegto sida wax u jiraan, waxayna tiri: " Muuminiinta Amiirkoodow, waxaan ahaa haweenay salaatu-leyl tukata, habeen habeennada ka mid ahna inta tukadey baan seexday, waxaana toosay iyada oo nin ku fadhiyo labadayda lugood dhexdooda, wuxuuna iiga wareegay (= igu sii daayey) wax danbaabburo la moodo, dabadeedna waa iska dhaqaaqay. Cumarna waa aqbalay dooddeedii, wuxuuna yiri: haddii tan labadaan buurood dhexdooda lagu dili lahaa, Eebbe waa idin cadaabi lahaa [wuxuu la hadlayaa dadkii waday oo damacsanaa inay dilaan], waana iska sii daayey, gobollada oo dhanna wuxuu u diray wareegto uu ku leeyahay: " Yaan la dilin qof aanan anigu idmin". Sidoo kale, Cali bin Abii Daalib markii uu khaliifka ahaa waxaa loo keenay bilcaan uur leh oo lagu tuhmayo inay sinaysatey, Calina wuxuu bilcaantii ku yiri: " Ma dhici kartaa in lagu xoogay/kufsaday" waxay tiri: "Maya." Haddana mar kale ayuu wuxuu ku yiri: " Haddaba, soo ma dhici karto in mid ku kufsaday adiga oo hurudda." Culumada qaarkoodna waxay ku doodeen in loo baahan yahay in xisaabta lagu darsado in uurka haweenayda lagu tuhmayaa uu gebi ahaanba yahay uur been ah [= Artificial insemination].

[11] Marka qura ee la oggol-yahay waa haddii dhakhaatiirtu caddeeyaan in sidaas oo keliya lagu badbaadin karo nafta hooyada uurka hel.

[12] Fuqahada islaamku waa isku khilaafeen in xukunka qadafka ee Aayaddu [=24:3] ka hadlayso uu ku dabbaqmayo ragga iyo in kale. Culumada qaarkood, siiba kuwa qiyaaska adeegsadaa waxay ku tageen in aysan ku dabbaqmayn, waxayna ku doodeen in aayaddu si cad u sheegayso dumarka muxsinaadka ah, sidaa darteedna loo baahan yahay in aayadda aan la siin macno aysan qaadan karin. Dhanka kale, Imaam Maalik wuxuu qabaa in marka laga hadlayo qadafka haweenayda nin ku eedaysa inuu kufsaday, loo baahan yahay in la eego nooca uu yahay ninka kufsiga lagu eedeeyey, oo haddii ninka la eedeeyey uu yahay nin lagu yaqaan wanaag iyo taqwo wuxuu xaq u yeelanayaa in haweenayda qadaf lagu xukumo, laakiin haddii uu yahay nin lagu yaqaan macsi iyo faasiqnimo waxaa arrinka loo daynayaa qaalliga oo laga doonayo inuu qiimeeyo sida wax u jiraan. Laakiin doodda Imaam Maalik waxaa si kulul uga jawaabay Imaam Ibnu Xasmi oo muujiyey in doodda Imaam Maalik ay ka dhalanayso in dadka la kala faquuqo, fursadaha garsoorkana aan loo sinnaan. Wuxuuna sheegay in doodda Maalik ay ka dhalanayso in haweenayda uu kufsado nin sumcaddiisu fiican tahay, wax marag ahna aan heli karin, ay ku khasbanaato in ay kala doorato labo daran midkood: in ay dacwayso oo haddii ay denbiga ku caddayn weydo ay halis u gasho in qadaf lagu xukumo iyo in ay iska aammusto. Xaaladdaan dambana haddii uur ku soo baxo waxay halis u galaysaa in lagu eedeeyo inay sinaysatay, dabadeedna xad lagu fuliyo. Labada xaaladoodna Ibnu Xasmi wuxuu ku tilmaamay kuwo dumarka xaqooda duudsinaya, caddaaladdana wax u dhimaya. Ibnu Xasmina waxay la tahay in haweenayda loo arko dhibbane caddaalad doon ah (Faahfaahinta

qodobkaanka fiiri buugga: Abuu Muxamed Cali Ibnu Saciid Ibnu Xasmi; Al-Muxallaa Bi Al-Athar).

[13] Dhab ahaantii, culumada islaamka badankoodu waxay qabaan in falka sinadu uu kulansado labo xaq oo kala ah: xaq Alle iyo xaq bulsho. Tusaale ahaanna, ruuxa si qarsoodi ah u sinaystaa wuxuu ku xadgudbey xaq Alle, sidaa darteedna ma jirto cid wax u raacanaysaa, loomana baahna in dabagal lagu sameeyo, laakiin ruuxa ku sinaysta meel dadweynuhu ka arki karaan wuxuu isku mar ku xadgudbayaa xaqa Alle iyo xaqa bulshada, sidaa darteedna wuxuu mutaysanayaa in la maxkamadeeyo iyada oo ujeedadu tahay in la ilaaliyo nidaamka guud iyo qiyamka bulshadu ay ku dhaadato.

[14] Waxaa xusid mudan in siyaasiga reer Koonfur Afrika ee Jacob Zuma kolkii sannadkii 2006dii lagu maxkamadeynayey gabar la sheegay inuu kufsaday, uu maxkamadda horteeda ka yiri: "Dharkii gabadhu xirnayd baan waxaan ka fahmay inay galmo rabto". Akhristow ma istiri Jacob Zuma waxaa seegtay inuu gabadha ku yiraahdo meeriskii Cilmi Boodhari ee ahaa: " Innaan Eebbahay idin khatalin qariya laabtiinna!"

Saciid A. Ismaaciil
Sismail42@gmail.com